

Macluumaadka Kaalmada Dhaqaale, Daryeelka Samofalka iyo Qorshaha Bixinta Kharashka

Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha

In badan oo kamid ah qoysaska bukaanka ayagu ee aan lahayn caymiska caafimaadku ma yaqaanaan hadii ilmahoodu u qalmo kaalmo. Children's Hospital Colorado waxa uu la shaqeeyaa bukaanka u qalma iyo qoysaska si ay u dalban lahaayeen kaalmada dawlada ee adeegyada caafimaadka. Hadii bukaanada iyo qoysaskoodu ayna u qalmin kaalmada dawlada, kooxda Latalinta Dhaqaalaha ayaa siin karta kaalmo dhaqaale oo kale oo ah qaabka qiimo jabin iyo qorshayaasha bixinta kharashka.

Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale waxa heli kara dhamaan bukaanka aan lahayn caymiska caafimaadka oo ku noon Marayakanka. Waxaanu uga fadhinaa qoysasku inay isticmaalaan dhamaan khayraadka jira kahor inta aan la eegin kaalmada dhaqaale.

U qalanka barnaamijyada badan ee kaalmadu waxa ay u baahan yihiin arjiyo si loo buuxiyo shuruudaha dhakhliga saboolnimada federalka kaas oo ku salaysan Saboolnimada Federalka

Heeka(ku yaala www.childrenscolorado.org). U qalanka kaalmada dhaqaale waxay ku xidhan tahay cabirka qoyska, dakhliga iyo da'da dalbadaha. Fadlan

nagalasoo hadal 720-777-7001 si aad ula hadasho Lataliyaha Dhaqaalaha. Waxay kaa caawin doonaan inaad dalabato barnaamijyada kaalmada dhaqaale ee jira.

Barnaamijka Samofalka Children's Hospital Colorado

Barnaamijka Samofalka Children's Hospital Colorado waxa uu bixiyaa kaalmo dhaqaale oo bukaanka iyo qoysaska baahan ah. Go'aan ku in lasiiyo daryeel samofal waxa uu, badanaa, ku xidhan yahay qiimaynta dakhliga qoyska iyo daynta wakhtiga booqashada, oo waxa uu caadiyan keenaa in lagu sameeyo miisan dhinac oo wada bixin dhanka qoyska ah.

Nuqulada Xeerkeeda Kaalmada Dhaqaale iyo Arjiga waxaa lagu heli karaa online (childrenscolorado.org) ama booqo ama la hadal xafiisyada ayada Lataliyaha Dhaqaale ee goobtaada:

Children's Hospital Colorado, Anschutz Medical Campus
13123 East 16th Avenue, Aurora, CO 80045
Taleefan: 720-777-7001

Children's Hospital Colorado, Colorado Springs
4090 Briargate Parkway, Colorado Springs, CO 80920
Taleefan: 719-305-9993

Nuqulada waxaa lagu heli karaa bilaash iyada oo luuqado badan ah, oo ay ku jiraan Ingiriisi iyo Isbaanish.

Waa maxay shuruudaha guudi?

*Waxyaabo kala soo reebo ayaa jiri kara

- U qalanka Medicaid, Child Health Plan+, Barnaamijka Colorado Indigent Care iyo caymiska caafimaadka kale
- Heerka Saboolnimada Federalka wax ka hooseeya 250%; marka la tiriyo cabirka qoyska, dakhliga iyo hantida la iibin karo
- Gubdinta macluumaadka loo baahan yahay 365 maalmood gudahood oo ka bilaabanta taariikhda markii ugu horeysay la iska saaray ee warbixinta xisaabta ee daryeelka la bixiyay

Xadiga Guud Ahaan Lasoo Dalacay(AGB)

Children's Hospital Colorado waxa ay xadidaa xadiga kharashaadka daryeelka hadii lasiinayo shakhsiga u qalma Kaalmada Dhaqaale. CHCO waxa ay isticmaashaa qaabab dib loogu eegayo sida ku cad xeererka §501(r) ee lagu ogaado AGB-ga.

Ikhtiyaarada Qorshe kharash Bixin

Kharashaadka Children waxa loo arkaa inay ku waajibaan dhamaan bukaanka iyada oo aan loo eegeynin awoodahooda bixinta kharashka ama qaabka bixinta kharashka. Children's Hospital Colorado waxay bixiyaan ikhtiyaaro bixin kharash oo dabacsan oo bukaanadeeda iyo qoysaskeena ah. In kasta oo qorshayaal bixino kharash ayna ka barnayn

6 bilood, waxyaabaha qaar ayaa laga soo reebayaa iyada oo laga duulayo kiiska. Si aad u samaysato qorshaha bixinta kharashka, fadlan la hadal 720-777-6422 si aad ula hadasho wakiil Adeega Macmiilka ah.

